



Diiradda la saarayo: Isku duwida daryeelka

Isku duwayaasha daryeelka waxay la shaqeeyaan adiga iyo daryeel bixiyayaashaada waxayna kaa caawiyaan in aad faa'iidada ugu badan ka hesho qorshahaaga caafimaad. Waan ognahay sida ay u noqon karto mid adag oo jahwareer leh. **Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawino.**

KA HOR Sidee...

Baa la ii fahmi karaa?

Baan u heli doonaa kursiga curyaanka?

Baan u heli doonaa dhakhtarka ilkaha?

Baan u heli doonaa agabyada sonkorowga?

Baan u heli doonaa balan?

Baan u heli doonaa daawo?

Baan u heli doonaa qof takhasus leh?

Baan u heli doonaa ilaha cuntada?

Baan igu xirmi doonaa ilaha guryaha?

Baan u heli doonaa la taliye?

Baan u qabsan doonaa balan?

Baan u xaqiijin doonaa in daryeel bixiyayaashu ay wadaagaan macluumaadka igu saabsan?

Baan wax uga qaban doonaa biilkani?

Baan u heli doonaa qoryshayga caafimaad?

KA DIB

Iyada oo uu kaa xigo hal wicitaan...



Isku duwayaashaada daryeelku waxay:

- Wax ka ogaan karaan baahiyahaaga oo kaa caawin karaan in la helo xalka saxda ah.
- Xaqiijin karaan in dhammaan daryeel bixiyayaashaadu uu midba midka kale la hadlayo.
- Kugu caawin karaan adeegyada dheeraadka ah, oo ay ku jiraan guryaha, cuntada (SNAP) iyo ilaha gaadiidka.
- Kuu heli karaan agabyada saxda, oo ay ku jiraan daawada, agabyada sonkorowga, kursiyada curyaanka, haamaha oksijiinka iyo waxyaabo badan.
- Kaa caawin karaan in aad hesho daryeel, baaritaano iyo daaweynta aad u baahan tahay.

Adeega Macmiilka ka wac **800-224-4840** ama **TTY 711** si aad waxyaalo dheeraad ah uga ogaato.

careoregon.org



Isku duwida daryeelku waa adeeg ay bixiso CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).



Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.



CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Kooxdeena isku duwida daryeelka ayaa kaa caawinaysa in aad maareyso dhammaan nidaamka daryeelka caafimaadka.



Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiyayaasha iyo kuwo kale.



CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Su'aalaha?

Ma jeclaan lahayd in aad waxyaabo badan ogaato? **Kooxdeena Adeega Macmiilka** ee waxtarka iyo saaxiibtinimada leh ka wac **800-224-4840** ama farriin ammaan ah noogu soo dir careoregon.org/portal

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.

